


TALLAALKA BCG

**DARYEELKA WAALIDIINTA
ILMOHOODA TALLAALKA DABADI**

SIDEE LOO DARYEELAA BARTA (DHAAWACA) TALLAALKA BCG





TALLAALKA BCG

Waxaad filan karto kaddib marka cunuggaaga la duro tallaalka BCG

Muddo 1-6 toddobaad gudohood ah, fin yar oo cas ayaa laga yaabaa inuu kasoo baxo meesha cirbadda tallaalka lagu muday. Meeshu waa inay ku bogsato muddo dhowr toddobaad gudohood ah.

6-12 usbuuc kaddib, waxaa dhici karta in finku isu beddelo boog yar oo af qoyan. Haddii taasi dhacdo, boogta ku dabool faashad shabaq leh, si hawadu ugu gudbi karto. **Ha isticmaalin sharootada dhaawaca.**

Waxay qaadan kartaa ilaa 3 bilood muddada nabarku ku raysanayo; waxaana dhici karta inuu astaan yar ku reebo meesha bogsatay, taasoo ah wax iska caadi ah.



Sida loo daryeelo barta tallaalka

- Barta tallaalku waa inay ahaataa mid nadiif ah oo engagan.
- Hadday boog noqoto, ku dabool faashad shabaq leh si hawadu usoo geli karto.



Ha tuujin hana xoqin barta tallaalka.



Ha ku dhejin sharooto dhaawaca dushiisa.



Haw isticmaalin dhaawaca boomaato, saliid, ama daawo dhireed.



Ha rugin (masixin) hana duugin (daliigin) barta tallaalka.

Wax dareen (walwal) ah haddaad qabto ama u baahan tahay xog ku saabsan TBda ama tallaalka BCG, fadlan la xiriir kalkaalisadaada Caafimaadka Guud.

MAGACA KALKAALISADA CAAFIMAADKA GUUD: _____

KHADKA TALEEFOONKA: _____

Wixii su'aal ah ama walaac ah ee aad qabto saacadaha la shaqeeyo dabadood fadlan wac 0800 611 116.